

# CAAFIMAADKA

Ku caawimeysa dhibbanayaasha colaada hubeysan iyo masiibooinka iyadoo u hagaajineyo helitaanka adeegyada daryeelka caafimaadka ee lagama maarmaanka ah.

## GARGAARKA DEG DEGGA OO LAGU BADBAADINAAYO NOLOL



©Bisha Osman/ICRC

Tababarka waxaa ka qeyb qaataay dad oo laga kala keenay 12 tuulo kala geddisan ee Gobolka Galgaduud. Ka qeyb galayaasha tababarka waxay noqonaayaan kuwa ugu horreeya ee ka socda bulshada oo jawaab ka bixiya haddii ay dhacdoo xaalad deg deg ah.

Dhaawacyada dadka soo gaara xilliyyada colaada waxay keeni karaan naafonimo daran ama geeri haddii aan lala tacaalin waqtiga loo baahanayaahay. Gargaar deg deg oo tayeysan oo islamarkiiba goobta laga sameeyo waxay xilliyyada deg dege sameyn karaan farqi u dhaxeeya nolol iyo geeri.

Soomaaliya meelaha xarumaha caafimaadka ay ku yarihiin ama ay kala fogiyihii, gar gaarka deg degga gaar ahaan marka jawaabta hore la bixinaayo waa muhim goortaas oo qabanaaya hawl wax ku ool ah oo deg deg ah taa oo yareyn karta dhaawaca sidaas darteedna hagaajinaaya fursadaha badbaadista.

Dhowaan, Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed (SRCS) waxay tababar ku saabsan gar gaarka deg degga siishey mutadawiciin laga kala keenay 20 tuulo oo ka tirsan gobolka Galgaduud bartamaha Soomaaliya si loo hagaajijo wax ka qabashada caafimaadka xilliyyada deg degga oo goobta caadi ka ah.

Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed iyadoo ku taagan dhedhexaadnimadeeda iyo

madaxbannaanimadeeda ayaa qabatay tababarka 5ta maalin ah oo lagu baranaayey casharo ku saabsan jajabka, kontroolo dhiigbaxa, gubashada, sumowga iyo qaadida dhaawaca.

Tababarka Gargaarka deg degga waa gundhingga caalamiga ee Dhaqdhaqaqyada Laanqeyrta Cas iyo Bisha Cas. Mutadawiciin ka kala socda kooxo kala duwan ayna ka mid yihiin bulshada, dawladda iyo xoogaga mucaaradka ayaa ka qeyb qaataay.


Tusaale ahaan, gudaha Afkhanistaan Guddiga Caalamiga ee Laanqeyrta Cas (ICRC) waxay tababar aasaaska Gargaarka deg degga iyo wax u qabasho gargaar caafimaad oo ku meel gaar ah siisay shakhsiyad ka kala tirsan Ciidamada Ammaanka Qaranka ee Afkhanistaan iyo

Kooxaha Hubeysan ee Mucaaradka. Hawshaan waxay raad ku leedahay Axdigaa koowaad ee Geneva, oo la saxiixay 150 sano ka hor, kaa oo ilaalinaya ku dhaawacma iyo kuwa xanuunsan xilliyyada colaada.

Gudaha Soomaaliya, tababarka wuxuu bulshada ku caawimaaya in si haboon ula tacaalaan xilliyyada deg degga.

"Waxaa naga go 'an in aan sii wadno iskaashigeena aan ku fidineyno awoodaheena ka jawaabida xaalada deg degga. Waaan rumeyasanahay mutadawiciinta ka kala yimid bulshada in si weyn u hagaajin doonaan ka jawaabida xaalada deg degga," sidaa waxaa yiri Gail Corbett, madaxa ICRC Soomaaliya ee maamulka isbitalada.

ICRC waxay joogteysay joogitaankeeda Soomaaliya tan iyo todobaatameeyadii si dhowna ula shaqeneysay SRCS si loo hagaajijo bixinta daryeel caafimaad eexasho laheyn wax ku oolnna ah ee waqtiyada iska horimaadka hubeysaniyo xaaladaha kale ee deg degga. Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed (SRCS) waxay dalka oo dhan ku leedahay 19 laamo iyo 150 laamo hoosaad.



Si aad u hesho macluumaad dheree ah oo ku saabsan ICRC-da Soomaaliya booqo  
[www.blogs.icrc.org/somalia/so](http://www.blogs.icrc.org/somalia/so)

Email: [sok\\_somaliblog\\_services@icrc.org](mailto:sok_somaliblog_services@icrc.org)